Qofka akhriya Xaraf ka mid ah Kitaabka Ilaahay wuxuu ka halayaa hal xasano, halka xasano waxay u dhigantaa toban laabkeed

Cabdullaahi Binu Mascuud Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Qofka akhriya Xaraf ka mid ah Kitaabka Ilaahay wuxuu ka halayaa hal xasano, halka xasano waxay u dhigantaa toban laabkeed, ma oranaayo {Alif Laam Miim} waa Xaraf, laakiin Alifku waa Xaraf, oo laamku waa Xaraf, oo Miimku waa Xaraf".

[Xadiis Xasan ah] [Waxaa wariyay At-tirmidi]

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay Qof kastoo Muslim ah oo akhriya Xaraf kitaabka Ilaahay ka mid ah, inuu ka helaayo hal xasano, kaasoo ajarka loo laalaabayo toban laabkeed. Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku cadeeyey hadalkiisaa isagoo dhahay: (ma dhahayo Alif Laam Miim) waa Xaraf, laakiin Alifku waa Xaraf, Laamku waa Xaraf, Miimkuna waa Xaraf): waxay ahaanaysaa sdddex Xaraf oo soddon xasano laga helayo.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/6275